


Fayraska cusub ee corona KUMA faafo taabashada maqaarka ama dharka



Fayraska cusub ee corona waxaa lagu kala qaadaa dhibcaja dheecaanka oo caabuqa leh, tusaale ahaan dhibco laga soo qaado, qufac, ama taabashada caabuqa, halkaas oo aad taabato wax fayras qaba kadibna aad taabatid indhahaaga, sankaa ama afkaaga. Sidaas awgeed fayrasku waa inuu gaara xuubka ka hor intaanad qaadin cudurka.

Fayraska corona ee cusub laguma kala qaado istaabashada maqaarka. Sidaa darteed, uma baahnid inaad u dhaqdo ilmahaaga ama dhammaan dharka ilmahaaga mar kasta oo isaga ama iyadu ay ka yimaadaan dugsiga ama xannaanada carruurta si looga fogaado caabuqa. Si kastaba ha noqotee, waa inaad hubisaa nadaafadda gacmaha oo aad u dhaqdaa ilmahaaga iyo gacmahaaga markaad guriga timaaddo.